

Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Caafimaadka Greater Portland

Foomka Ruqsadda ee Isticmaalka iyo Kashifaadda Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka

Marka aan hoos saxiixo hoos, waxaan qiraya oo oggolaanaya waxa soo socda, xagga diiwaan gelinta ilmahayaga Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Greater Portland ('Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH') iyo kashifaadda diiwaanka caafimaadka ilmahayga iyo macluumaadka la xariira.

- Anigu waxaan helay oo akhristay Ogeysiiska Dhaqanka Macluumaadka Caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee kala talliya isticmaalka iyo kashifaadda lagu sameeyo macluumaadka caafimaadka ee ku jira diiwaankeyga caafimaadka ilmahayga, sida waafaqsan heerarka qarsoodiga HIPAA.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu galo diiwaanka caafimaadka Dugsiga ilmahayga, oo ey ku jirto balse aan ku ekayn diiwaanada jirka, dabecadda, iyo la-tallinta haddii ay jirto, iyo macluumaad kasta oo la xariira, loona isticmaalo ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida uu rabo ama uu ogol yahay sharciga sida ay go'aan ku gaarto Xarunta Caafimaadka GPH.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay Dugsiga (kana mid ah kalkaalinta iyo shaqaalaha bulshada) siiso macluumaadka laga soo qaaday diiwaanada Xarunta caafimaadka Dugsiga GPH hadba sida loogu baahan yahay iyo sida ku habboon ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida loo baahan yahay ama sida sharcigu ogolyahay sida ay go'aan ku gaarto Greater Portland Health.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay macluumaadka ku jira diiwaanaada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH (kana mid ah diiwaanada caafimaadka Dugsiga haddii uu ku jiro diiwaanka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH) la qeybsato takhaatiirta kale ee ku hawlan daaweynta iyo bixiyeyaasha kana mid ah bixiyeyaasha daryeelka aasaasiga, takhaatiirta ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka Dhimirka, in ay fududeyaan daryeelka caafimaadka ee la siiyo Ilmahayga.
- Anigu waxaan u fasaxay bixiyaha daryeelka ilmahayga, takhtarka ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka dhimirka ("Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad") in ay bixiyaan macluumaadka caafimaadka iyo diiwaanada siiyaan Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH si loo fududeeyo geynta daryeelka caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee la siiyo ilmahayga. Anigu waxaan fahamsanahay in ay dhici karto in Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad i weyddiyaan in aan siiyo ruqsad gaar ah si aan u ogolaado kashifaadda diiwaanada la xariira daaweynta ay fulliyaan Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu sii daayo macluumaadka laga soo qaado diiwaanada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in loo baahan sii biilasha loogu dallaco ceymiska ama bixiyeyaasha kale.
- Anigu waxaan fahamsanahay oo aan oggolahay in: (i) Oggolaanshahaani shaqeyn doono muddo hal sanno laga bilaabo taariikhda saxiixa haddii aysan jirin muddo gaaban; iyo (ii) waxaan la noqon karaa ruqsaddaan waqti kasta marka la gudbiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan la noqoshada ruqsadda; marka laga reebo marka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH isku haleeyo ogolaashada asalka.

✎ **Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha:** _____

Taariikhda: _____

Daabac Magaca: _____

Xariirka ka Dhexeeyo: _____